

HEALTH CARE CONNECT (XIDHIIDHKA DARYEELKA CAAFIMAADKA)

Wuxuu kaa caawiyaa helitaanka khakhtarka qoyska ama kal-kaaliye caafimaad

ontario.ca/healthcareconnect

'Health Care Connect' wuxuu dadka aan haysan daryeelaha caafimaadka qoyska ayuu ka caawiyaa in ay dhakhtarka ama kal-kaaliyaha caafimaadka qoyska helaan.

'Health Care Connect' sideebu kaaga caawin karaa helitaanka daryeelaha caafimaadka qoyska?

'Health Care Connect' waa barnaamij caawinaya dadka aan dhakhtarka qoyska haysan si ay u helaan dhakhtarka caafimaadka qoyska. Barnaamijku wuxuu raadiyaa dhakhaatiirta ama kal-kaaliyayaasha caafimaadka ee bukaanada qaabili kara, kaddibna wuxuu la xidhiidhayaa dadka u baahan adeegga ay shaqaalahaasi caafimaadku bixiyaan.

Habka Barnaamijka Loogu Soo Biiri Karo

Way fududdahay in 'Health Care Connect' la iska-diiwaangeliyo. Soo wac taleefoonka 1-800-445-1822, kaddibna waxaa kula hadli doona qof ku-weydiin doona su'aalo gaagaaban oo isku-xiga, kaddina barnaamijka kaa diiwaangelin doona. Waxaa kale oo aad iska-diiwaangelin kartaa shabkadda internet-ka ee ah

ontario.ca/healthcareconnect

'Health Care Connect' wuxuu mudnaanta siinayaa kuwa qaba baahida ugu-weyn ee helitaanka caafimaadka qoyska

Mudnaanta ugu horaysa waxaa la siinayaa shakhsiyaadka qaba baahida ugu weyn ee dhinaca daryeelka caafimaadka

Marka daryeelaha caafimaadka lagu helo, waxaa lagula xidhiidhin doonaa dhakhtar qoys ama kal-kaaliye caafimaad

'Health Care Connect' waxay diyaar u tahay in ay adiga ku caawiso. Laakiin waxaa lagaaga baahan-yahay in sii waddid dadaalka aad dhakhtar qoys ku raadsanaysid

Maxay yihii arrimaha aad u baahan-tahay in aad ogaatid ee la-xidhiidha 'Health Care Connect'

- 'Health Care Connect' waxay kaa caawisaa helitaanka dhakhtarka qoyska ama kal-kaaliyaha caafimaadka
- Maadaama uusan dammaanad-qaadi karayn in uu kuu heli karo, waxaa lagaaga baahan-yahay adiguna in aad dhankaaga ka dadaashid sidii aad dhakhtarka qoyska u heli lahayd
- Waa in aad leedahay lambarka OHIP.

Xidhiidhyaha Daryeelka Caafimaadku wuxuu kaa caawinayaa sidii aad u heli lahayd dhakhtar qoys

Kaddib marka aad ku soo biirtid barnaamijka 'Health Care Connect', kal-kaaliye-caafimaad oo lagu magacaabo Xidhiidhiyaha Daryeelka Caafimaadka ayaa lagu samayn doonaa, kal-kaaliyahaasi caafimaadkuna wuxuu kaa caawin doonaa sidii aad goobtaada uga heli lahayd daryeel-caafimaad.

Xidhiidhiyahaaga Daryeelka
Caafimaadka iyo Adiga
Haddii aad cinwaangaaga beddashid ama
aad la kulantid isbeddel dhinaca
caafimaadka, la socodsii
Xidhiidhiyahaaga Daryeelka
Caafimaadka

Miyaad u baahan-tahay dhakhtar qoys ama kal-kaaliye caafimaad? Soo wac 1-800-445-1822 ama eeg shabakadda internet-ka ee ah ontario.ca/healthcareconnect

